

## **Maamulka Waxbarashada Hopkins oo Dalabanaya in loo Codbixiyo Sadex Isbadal**

Maalinka Talaadada ee 7 November, Maamulka Waxbarashada Hopkins waxa uu qabanayaa doorasho codbixineed oo ka kooban sadex su'aalood oo kala ah — Dayn si hordhac ah loo sii qaadanayo si loo balaariyo goobaha waxbarashada, canshuur dheeri ah oo la bixinayo si qalabka waxbarashada iyo manhajka loo tayeeyo iyo canshuur kordhin lagu daboolayo kharashka guud ahaan lagu kobcinayo hawlaha waxbarashada. Gudiga Waxbarashada Hopkins ayaa shirkoodi 22 August ku go'aamiyay in sadexdaa arimood codbixiyayaasha loo bandhigo. Hadii sadexdaa su'aalood la ansixiyo, qiyaastii dadka guryaha ku leh deegaanka waxbarashada Hopkins waxay bixinayaan celcelis ahaan \$3 oo dheeri ah bishiiba.

“Ansixinta sadexdan qodob waxa ay maamulka waxbarashada Hopkins siinaysaa awood ay ku horumariyaan goobaha waxbarashada, qalabka waxbarashada, manhajka iyo caawinaada kale ee ay ardaydeenu u baanayihiin nagana mudanyihiin in aan u samayno,” sidaa waxaa yiri Dr. Rhoda Mhiripiri-Reed, maamulaha sare ee waxbarashada Hopkins.

### **Sii Qaadashada Daynta**

Qorshaha la doonayo in la ansixiyo: \$30 million oo dayn hormaris ah si loo dayactiro loona horumariyo xarumaha waxbarashada. \$6.9 million waxaa loo isticmaalayaa maalgalinta canshuurta kirada, oo wadata macaash aad u qiime hooseeya si loo tashiilo lacagta canshuur bixiyayaasha. Imisa ayay ku kacaysaa: Hadii la ansixiyo. Celcelis ahaan dadka leh guryaha Hopkins bishii waxa ay bixinayaan \$2.

### **Mashruuca Canshuur Kordhinta**

Waxaa la soo jeediyay: In la abadalo qaabkii hore canshuur kordhinta ee sanadihii 2010 iyo 1013 oo hada soo saara \$9.4 million sanadkii oo lagu bixiyo manhajka iyo qalabka waxbarashada oo la doonayo in laisku daro oo ay noqdaan hal shahuuc kordhin. Degmada Hopkins waxa ay codsanaysaa in la sameeyo canshuur kordhin aad u hoosaysa oo noqonaysa in ka yar 0.5% soona siyaadinaysa \$500,000 sanadkii. Imisa ayay ku kacaysaa: Hadii la ansixiyo canshuur kordhintani waxa ay jiri doontaa mudo 10 sano ah, waxayna dadka guryaha leh ku siyaadinaysaa \$1 bishiiba.

### **Canshuur Kordhinta Howlaha Waxbarashada**

Waxaa la soo jeediyay: In la badalo qaabka maalgelineed ee hada canshuurta loogu jaro hawlaha waxbarashada, laguna badalo qorshe 10 sano soconaya kaas oo kharashka ardaygiiba ka dhigaya isku mid. Maalgalintani waxa ay soo saaraysaa \$15 million sanadkiiba. Imisa ayay ku kacaysaa: Hadii la ansixiyo ma jiri doonto canshuur dheeri ah oo ay dadka guryaha leh bixinayaan.

Imisa ayay bishii iigu kacaysaa?

$$\$2 + \$1 + \$0 = \$3$$

Hadii uu qiyaas ahaan qiimaha gurigu yahay \$250,000.